




# Naaslayda








# Naasleyda

Leveled

Grade 2

Week 16



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, *adjust*, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Naasleydu waxay ka  
midtahay xayawaanka laf-  
dhabarlayda ah.



Naasleydu waa  
xayawaanka naaska leh.




Naasleydu waxay dhashaa  
ilmo u eg iyaga.




Naasleydu waxay sidoo  
kale nuujisaa ilmaheeda  
naasaha.







Naasleydu ma dhasho  
ukun waxayse dhashaa  
ilmo.





Naasleydu waxaa kaloy  
leeyihiin afar adin ama  
lugood.



Naasleyda Jidhkoodu  
wuxuu leeyahay dhogor.




Naasleyda waxaa loo  
qaybiyaa laba qaybood  
oo kala ah.




Naasleyda duurjoogta  
sida libaaxa, shabeelka,  
goodirka, deerada iyo  
maroodiga.



Naasleyda ah dabjoogta  
sida geela, adhiga, lo'da,  
fardaha, iyo dameeraha.



Naasleyda qaar keed  
geeso ayay leeyihiin  
qaarna malaha.



Naasleydu waxay cuntaa  
dhirta, daaqa iyo hilibka.



